# Horumarinta Amaanka Gaadiidka Ee Philips

## Warbixinta Kooban ee Ka Qeybgelinta dadweynaha ee Kuleylihii 2021

Minneapolis
City of Lakes

Magaalada Minneapolis waxa ay qabatay kulankii ugu horeeyey ee ka qeyb gelinta bulshada ee Mashruuca Amaanka Gaadiidka Ee Philips ee kuleylaha iyo deyrta ee 2021. Shaqaaluhu waxa ay ka soo ururiyeen macluumaad fara badan kulamada dadweynaha, sahanka barta internetka, kulamada fool ka fool ah iyo kuwa internetka, iyo kulamada kale ee wacyi gelinta.
Macluumaad guud oo ku saabsan mashruuca wxa aad ka heli kartaa: https://wwww.minneapolismn.gov/projects/phillips/

## Nidaamka Ka Qeyb Gelinta

Shaqaalaha hawalaha guud waxa ay macluumaadka kaga soo ururiyeen dhawr hab oo kala duwan:

- **Ka qeyb galka kulamada bulshada iyo xafladaha:** Shaqaalaha hawlaha guud waxa ay ka qeyb qaateen kulmada dadweynaha iyaga oo xiriir la yeeshay hay'adaha ka qeyb qaadanaya, sida ururada xaafadaha, Little Earth, iyo Communidades Latinas Unidas en Servicio (CLUES). Shaqaaluhu waxa ay soo ururiyeen ra'yi dhiibasho ku saabsan isgoys gaar ah iyo sidoo kale ra'yi dhiibasho guud oo ku saabsan amaanka gaadiidka ee xaafadaha.
- **Qabashada Kulamada Dadweynaha:** Shaqaalaha hawlaha guud waxa ay qabteen kulamo fool ka fool ah iyo kuwa barta internetka, oo ay ka mid tahay kulamada bulshada, kulan dadka u furan ee internetka, iyo kuwo fool ka fool ah.
- **Sahanka Internetka iyo Isticmaalka Khariidadda:** Shaqaalaha hawlaha guud waxa ay adeegsadeen sahanka barta internetka iyo khariidada oo ka qeyb galayaashu ku soo bandhigeen fikradahooda iyo waxyaabaha dareenka ka qabaan.



## Qiyaasta Ka Qeyb Gelinta iyo U Sinaashaha

Xaafadda Philips waxaa deggan dad fara badan oo aan ku hadla afka Ingiriisiga. Iyada oo xaaladaas la eegayo, shaqaaluhu waxa ay qaadeen talaabooyin lagu yareynayo caqabadaha hor taagan ka qeybgalka, oo ay ka mid tahay waxyaabo lagu daabacay luqado kala duwan (Ingiriisi, Soomaali, iyo Isbaanish), bandhig iyo kulamo lagu soo bandhigay luqado kala duwan iyo goobo kala duwan oo bulshooyinka u gaar ah. Goobaha xafladaha iyo kulamada lagu qabtay waxaa ka mid ah Little Earth, Mercado Central, Waite House, Moolka 24ka, Moolka wadada 13aad iyo Dugsiga Anderson/Stewart Park.

## Soo Koobid Waxyaabaha La Ogaaday

- Waaxda Hawalaha guud waxaa soo gaaray 351 ra'yi dhiibasho ku saabsan mashruuca ee ka qeyb gelinta koowaad. Ra'yi dhiibashadaas, 286 ka mid ah waxa ay ku saabsanaayeen dareen horay u jiray iyada 65 ka mid ah ay ahaayeen codsiyo la xiriira horumarinta amaanka gaadiidka.
- Inta badan ra'yi dhiibashada, 257 ka mid ah, waxa ay soo gaareen kulamada fool ka fool ah ee dhacdooyinka, halka 94 ka mid ah lagu soo diray barta internetka.
- Dareenka ugu badan ee deganayaasha waxa uu ahaa gaadiidka ku socda xawaaraha badan (47 ra'yi), waxyaabaha la xiriira aragga (33 ra'yi), iyo amaandarada bushkuleetiyada (32 ra'yi)
- Goobaha faalada ugu badan laga bixiyey waxa ay ahaayeen wadada 26aad/Cedar (22ra'yi), wadada 28aad/Cedar (13 ra'yi) iyo wadada 24aad/Cedar (12 ra'yi)
- Waxyaabaha inta badan la codsaday waxaa u badnaa isbedel lagu sameeyo calaamadaha ama xariiqaha wadada (15 ra'yi), gaadiidkaiyo basaska oo aad loo sii kala saaro (13 ra'yi), iyo dhinaca gaadiidku u socdo (sagaal ra'yi).

Wixii su'aalo ah? La xiriir Trey Joiner, Waaxda Hawlaha Guud Ee Minneapolis ee 612 - 271 -8684
ama Phillips.Traffic@minneapolismn.gov

# Horumarinta Amaanka Gaadiidka Ee Philips

## Warbixinta Kooban ee Ka Qeybgelinta dadweynaha ee Kuleylihii 2021

Minneapolis
City of Lakes

### Talaabada Xigta

Jadwalka mashruuca ayaa halka hoose lagu soo bandhigay. Shaqaalaha Hawlaha Guud waxa ay diyaarinayaan fikradda horudhaca ah ee mashruuca dhamaadka 2021 iyo bilowga 2022, iyada oo fikraddaas lala wadaagayo bulshada looguna wareegga labaad ee ka qeyb gelinta ee 2022.

1. **Wareegga Koowaad ee Ka Qeyb Gelinta Dadweynaha:** Horudhaca Mashruuca iyo Ogaashaha Goobaha Furaha ah — Kuleylaha/Deyrta 2021
2. **Abuuritaanka Naqshadda Mashruuca:** Diyaarinta naqshadda horudhaca ah taasoo ku saleysan sharciyada Magaalada iyo ra'yi dhiibashada bulshada. — Xagaaga Waji IIA 2022; Xagaaga Waji IIB 2022
3. **Wareegga Xiga ee Ka Qeyb Gelinta Dadweynaha:** Wadaagista naqshadda, ururinta ra'yiga, iyo wax ka bedelka naqshadda mashruuca talo soo jeedinta ka dib. — Dhicid 2022 2022
4. **Faahfaahin Ku Saabsan** — 2023 - 2024

## Waxyaabaha Ka Soo Baxay Ka Qeyb Gelinta


Sadex shay ayaa ka soo baxay kulanka ka qeyb gelinta: taxadar la'aan oo gaadiidka loo wado, arrimaha bushkuleetiyada/dadka lugeynaya, iyo codsiyada horumarinta wadooyinka. Halka hoose waxaa ku xusan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mid kasta.

### Taxadar La'aan U Wadidda Gaadiidka

Dad badan ayaa faaladooda ku qoray gawaarida oo si taxadar la'aan ah loo wado. Gawaarida oo si mas'uuliyad daro ah loo wado waxaa loo sii kala qaaday afar darajo: wadayaasha oo sharciga jabiya, xawaaraha, wadid aan mas'uuliyad daro ah, iyo soo sheegista shilalka dhaca.
Gawaarida oo si Mas'uuliyda daro ah loo wado waxaa ka mid ah gawaarida kale oo aad loogu dhawaado, waddo hal dhinac u socota oo laga hor yimaado, leexasho oo iyada oo aan gawaarida kale, dadka lugeynaya iyo bushkuleetiyada la iska eegin.

Faalada laga bixiyey shilalka waxa ay aheyd faalo ku saabsan shilalka ka dhaca goobo gaar ah.

Faalada Laga Bixiyey Gawaarida Taxadar La'aanta Loo Wado





Si aad u hesho fududeynta suurogalka ah ama aad ku hesho habab kale,fadlan la soo xiriir:
Trey Joiner, Waaxda Hawlaha Guud Ee Minneapolis ee 612 - 271 -8684 ama Phillips.Traffic@minneapolismn.gov


Dadka dhagaha la'a ama maqalku ku adag yahay waxaa lagu xirayaa adeegga iyaga oo waca 311 ee 612-673-3000. TTY ha soo wacaan 612--673-2157.

# Horumarinta Amaanka Gaadiidka Ee Philips


## Warbixinta Kooban ee Ka Qeybgelinta dadweynaha ee Kuleylihii 2021

Minneapolis
City of Lakes

### Bushkuleetiyada Iyo Dadka Lugeynaya

Waxaa jiray faalo badan oo bulshadu soo jeediyeen oo ku saabsan bushkuleetiyada iyo dadka lugeynaya ee xafiisyada. Hadalku waxa uu u badnaa dadka oo aan kalsooni ku qabin oo ay ugu wacan tahay xawaaraha, ka gudubka wadada xilliga qaboobaha, iyo dareenka caruur wadada ka talaabeysa. Faalada laga bixiyey bushkuleetiyada iyo gawaarida la dhigto khadka bushkuleetiyada, gaawaarida oo leexda iyaga oo aan iska eegin bushkuleetiyada ka talaabaya. Faalada ku saabsan wadada oo aan si amaan ah looga talaabi karin waa mid khuseysa dhamaan noocyada gaadiidka.

Nooca Faalada Bushkuleetiyada Iyo Dadka Lugeynaya




### Horumarinta Wadooyinka


Waxaa jiray dhawr faalo oo xoogga saaraya dareen laga qabo naqshadda wadooyinka sida goobaha gaadiidka la dhigto, nalalka, calaamadaha, iyo xariiqaha dhulka ee wadada. Halkan waxaa ku xusan tusaalayaal muujinaya sida faalooyinka loo kala saaray:

**Arrimaha La Xiriira Aragga** oo ay ka mid yihiin faalo ku saabsan nalalka iyo goobaha gaadiidka la dhigto oo ay adag tahay in dadku arkaan gawaarida soo socota.

**Arrimaha la xiriira goobaha gaadiidka la dhigto** oo ay ka mid yihiin gawaarida si khalad ah la isku dhinac dhigo, in ay adkaato helitaanka goob gaadiidka la dhigto agagaarka goobaha ganacsiga.

**Wadada oo dhinac khalad ah loogu socdo iyo leexasho aan amaan aheyn** waxaa loola jeedaa in wadooyinka halka dhinac u socda dhinac khalad ah loo raaco ama aan laga leexan bushkuleetiyada iyo dadka lugeynaya marka gawaaridu leexanayaan.

Noocyada Faalooyinka Horumarinta Wadooyinka




**Naqshadda Wadooyinka** faalooyinkan waxaa ka mid ah in la sameeyo calaamado dheeraad ah oo gaadiidku istaago, wadada 26 iyo 28 oo laga dhigo wadooyin gaadiidku labada dhinac u kala socdo iyo codsiyo kala duwan oo la xiriira horumarinta wadooyinka sida in loo sameeyo waxyaabaha yareeya xawaaraha, kala qeybin iyo hagaajinta calaamadaha/ xariiqaha dhulka.

Si aad u hesho fududeynta suurogalka ah ama aad ku hesho habab kale,fadlan la soo xiriir:
Trey Joiner, Waaxda Hawlaha Guud Ee Minneapolis ee 612 - 271 -8684 ama Phillips.Traffic@minneapolismn.gov

Dadka dhagaha la'a ama maqalku ku adag yahay waxaa lagu xirayaa adeegga iyaga oo waca 311 ee 612-673-3000. TTY ha soo wacaan 612--673-2157.


# Horumarinta Amaanka Gaadiidka Ee Philips

## Warbixinta Kooban ee Ka Qeybgelinta dadweynaha ee Kuleylihii 2021

Minneapolis
City of Lakes

## Horumarinta lagu talinayo

Jaantuska dhinaca bidixda waxa uu muujinayaa noocyada faalada ee deganayaasha ee horumarinta wadooyinka. Inkasta oo faalada inteeda badan ay la xiriirtay badbaadada gaadiidka, hadana waxaa jiray dhawr talo oo ku saabsan qurxinta.




## Faalada ku saabsan goobaha

Khariidadda hoose waxa ay muujineysaa faalada isgoyska  Faalooyinka qaarkood kuma aysan jirin macaaluumaad ku saabsan goob gaar ah, sidaa darteed khariidad lagama sameyn.  Waxaa intaa dheer, goobaha aan laga bixin wax ka badan sadex faalo lama soo bandhigin  Isgoysyada calaamadaha leh (sida wadada Cedar, Bloomington, iyo Chicago) ayaa faaladu u badneynd. Wadooyinka qaarkood faalo aad u tiro badan ayaa laga bixiyey - Wadada Cedar, Park, iyo Portland - waxaa leh Degmada Hennepin. Waaxda Hawlaha Guud ee Minneapolis waxa ay faalada la wadaageysaa shaqaalaha Degmada Hennepin.





Si aad u hesho fududeynta suurogalka ah ama aad ku hesho habab kale,fadlan la soo xiriir:
Trey Joiner, Waaxda Hawlaha Guud Ee Minneapolis ee 612 - 271 -8684 ama  Phillips.Traffic@minneapolismn.gov


Dadka dhagaha la'a ama maqalku ku adag yahay waxaa lagu xirayaa adeegga iyaga oo waca  311 ee 612-673-3000. TTY ha soo wacaan 612--673-2157.